## SUURAT ASH-SHARX:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

*1. Miyaannaan kuu waasicinin laabta ( kuu nuurinin )*

*2. Oonnaan kaa dajinin culayskii*

*3. dhabarka kaa cusleeyay*

*4. Miyaannaan kor yeelin magacaaga ( xusiddaada )*

*5. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd ( faraj )*

*6. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd*

*7. Ee markaad Salaadda dhammayso isku dhib ( Samo fal )*

***Qur'an 94: 1-8***

***Sharaxa Suuradaan:***

Eebe wuxuu Nabiga " Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee" ku mannaystay wanaag badan, sida laabta oo loo nuuriyay, culayska oo laga dajiyay, iyo magaciisa oo la kor yeelay, wuxuuna Eebe sheegay in cidhiidhi kasta faraj ku dhaw yahay, wuxuuna faray in ducada iyo khayrka lagu dadaalo, Eebana wanaag laga rajeeyo.

Qataada waxaa laga wariyay in loo sheegay in Rasuulkii Eebe " Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee" Asxaabtiisii ugu bishaareeyay aayaddan yidhi: 'Hal cidhiidhi kama adkaado laba fudayd.'

Waxaa wariyay Ibnu Jariir